



## **‘Dhallinyarada da’ yarta ah ee Dugsiga Dhexe ee Sellwood aadkana u isticmaala internet-ka iyo kumbuyuutarada ayaa shaashada ka soo muuqan doona**

Ardaygaagu ma ka mid yahay ardayda telefoonka iyo kumbuyuutarada aadka u isticmaala? Waligaa miyaad ka fikirtay in uu dhibaateynayo ilmahaaga aad jeceshahay? Ururka Macalimiinta/Waalidka ee Dugsiga Dhexe ee Sellwood waxa ay soo bandhigayaan dukumentari aad loo ammaanay oo ku saabsan dhallinta da’da yar ee sida aadka u isticmaala telefoonada iyo kumbuyuutarada oo qolka jimicsiga iskuulka maalinta Khamiista, bisha Maarso 15keeda, saacada 7:00 habeenimo ilaa 8:15 habeenimo.

Waxaa qoray oo soo jeedinaya dukumentariga dhakhtar, filim sameeyo reer Seattle ah oo la yiraa Delaney Ruston, filimkani wuxuu baaris ku sameynayaa raadka koriinka maskaxda uu ku sameynayo waqtiga ay ku lumiyaan inay ku jiraan online. Dhakhtaradani Ruston waxa ay isticmaaleysaa dhibtii ka haysatay qoyskeeda sidii ay u maareyn lahayd waqtiga ay daawanayaan shaashadaha iyada oo raadineysa raadka uu ku reebayo isticmaalka baraha bulshada, ciyaaraha lagu ciyaaro shaashadaha iyo waqtiga xad dhaafka ah ee dhallinyarada da’da yari ay isticmaalayaan internetka.

Ardayda, qorayaasha, aqoonyahanada cilmi nafsiga iyo saynisyahanada maskaxda waxa ay miisaanka saarayaan waqtiga la daawado shaashaduhu sida ay saameyn ugu yeeshaan maskaxaha da’ yarta iyada oo siineysa soo jeedin sida ay caruurta u isticmaali karaan qalabkan casriga ah ee dunidu isticmaasho maanta.

“Arrinkani wuxuu raadeeyey dhammaan qoysaskii, macalimiintii iyo ardaydaba, sidaas awgeed waxaa muhiim ah in ay bulshada Sellwood fursad u heleen inay daawadaan filimkan iyaga oo raadinaya dariiqooyin waxtar iyo caafimaad leh oo ay u isticmaali karaan teknoolajiyada,” waxaa sidaas yiri Karl Newsome, Maamulaha Sellwood.

Daawashada filimkaasi waxa ay dadka waaweyni ku soo galayaan \$5 iyada oo caruurta yari yari ay ku soo galayaa bilaa lacag.

*-Pamela Jordan*